

Waxa aad xaq u leedahay in aad waqti shaqo ka bixid ah qaadato, adiga oo isticmaalaya fasaxyadan mishaharka aan lahayn ee shaqaduna ilaalsan tahay:

FASAXA XANUUN

3 maalmood oo aad u qaadan karto xanuunkaaga, dhaawacaaga iyo caafimaadkaaga degdeg ah.

FASAXA BAROORTA

2 maalmood oo aad u qaadan karto dhimashada qof qoyska ka mid ah

FASAXA XIL QOYS

3 maalmood oo aad u qaadan karto xanuunka, dhaawaca, caafimaad degdega ama hawl degdega* uu ku dhacay xubin qoyska ah:

- Lammaanahaaga (qab ama ha qabin, kula jinsiya ama jinsi kale ah)
- Ilmahaaga, ilmaha lammaanahaaga, ilmaha aad korsatay, waalidkaaga, waalidka lammaanahaaga, waalidka ku korsaday, awowgaa ama ayaeydaa, awowga ama ayeyda lammaanahaaga, ilmaha aad awowga u tahay ama ayeyda, ilmaha awowga ama ayeyda lammaanaagu u yahay ama kuwa lammaanahaagaba.
- Walaalka ama walaashaa
- Ilmahaaga lammaanihiisa/lammaanaheeda
- Qaraabo adiga kugu tiirsan gargaar ahaan iyo si kaleba.

*Hawl degdeg ihi waxa weeye arrin aan la qorshaynin ama ka baxsan xakamayntaada, oo dhibo ka iman karaan ama dareen xuma leh, haddii aadan ka hawl gelin. Waxa ka mid ah, ilaaliyaha ilmahaaga oo joojiyay ilaalintii xanuun awgii ama waalidkaaga gaboobay oo arrin degdeg ihi ku timid.

Sarkaalkaagu waxa uu ku warsan karaa caddeyn "macquul ah" si aad fasax u qaadato. Waa in aad sarkaalkaaga ugu sheegtaa sida ugu dhaqsaha badan in aad fasax u baahan tahay. Waxa aad ugu sheegi kartaa telefoon – umana baahnid in aad qoraal ogaysiin ah siiso. Waa in aad u shaqaysay 2 todobaad oo isku xiga loo-shaqeeye isku mid ah inta aadan qaadan maalin fasax ah.

FASAXA DHIB GURI AMA XOOG GALMO

Haddii adiga ama ilmahaagu aad la kulantaan dhib guri ama xoog galmo ama hadidaad dhib guri ama xoog galmo, waxa lagu ogol yahay ilaa 10 maalmood oo fasaxa ama ilaa 15 todobaad oo fasaxa. 5 maalmood ee ugu horaysa ee sanad kasta, mishahar ayaad leedahay. Inta kale ma laha mishahar.

Loo-shaqeeyayaasha waxa loo ogol yahay in ay ku weydiyaan in aad u keento caddeyn. Waa in aad 13 todobaad oo isku xiga u shaqaysay loo-shaqeeye isku mid ah si aad xaq ugu yeelato fasaxan.

HELISTA FAA'IIDOOYINKA CAYMISKA SHAQADA (CS) ADIGA OO FASAX KU JIRA

Fasaxyada qaarkood, waxa aad ka heli kartaa Caymiska Shaqada (CS) dawlada federaalka. Xeerarka xaq kuu siinaya faa'iidooyinka CS, way u kala geddisan yihiin noocyada fasaxyada. Si aad u hesho in aad u qalanto faa'iidooyinka CS, waxa aad wacdaa Khadka waraysiga Caymiska Shaqada ee ah 1-800-206-7218 ama booqo www.canada.ca/en/services/benefits/ei.html.

Faa'iidooyinka CS ee xanuunka: Haddii aadan shaqo tegi Karin xanuun ama dhaawac awgii.

Faa'iidooyinka Dhalimada ama Waalidnimada: Haddii aad uur leedahay ama aad tahay waalid cusub.

Faa'iidooyinka Haynta Xubin Qoys:

- Faa'iidooyinka Haynta Xubin Qoys:
- Fasax Caafimaad ee Qoys: Waa xubin qoys oo dhimasho looga boqo in ay ku timaado muddo ka yar 26 todobaad. Waxa aad fasaxan ugu qalmi kartaa "faa'iidooyinka haynta naxariista" ee CS.
- Fasaxa Xanuunka Daran: Waa haynta ilmo ama qof weyn oo qoyska ka mid ah oo uu hayo xanuun daran.

Waxa aad ka hubisaa warar kale oo arrimahan ama fasaxyadan ku saabsan Mmareegta Wasaarada Shaqada: <https://www.ontario.ca/document/your-guide-employment-standards-act-0>.

IS ILAALI

Sarkaalkaagu kuuma hanjabi karo, kumana eryi karo ama kuguma ciqaabi karo qaadashada ama qorshaynta in aad qaadato fasaxyada mid ka mid ah. Marka aad fasaxa ka soo noqoto, waa in aad shaqadaadii hore aad heshaa iyo xilalkeedi oo la mid ah kuwii hore ama shaqo kale oo leh mishahar la mid ah, haddii aysan jirin shaqadaadii hore. Haddii ay dhibo kaa haystaan qaadashada fasax ama aad u malayso in xuquuqdaadii lagu xadgudbay, qor tafaasiisha oo dhani, gargaarna na soo weydiiso. Wicista oo dhan waa bilaash, waana qarsoodi.